BAYAANKA / OGEYSIISKA CILMI-BAARISTA
Xeerarka ilaalinta xogta guud ee EU
Qodobbada 12 ilaa 14
Taariikhda abuurka: 28.11.2021

Xogta ku saabsan falanqaynta macluumaadka shakhsiga ee baaritaanka 'Navigating diversity in Islamic religious education. A study of home-school collaboration between teachers of Islamic religion and Muslim parents in Finnish public schools'

Waxaad ka qayb qaadanaysaa baaritaan lagu sameeyay Jaamacadda Helsinki *Navigating diversity in Islamic religious education*. A study of home-school collaboration between teachers of Islamic religion and Muslim parents in Finnish public schools' Ujeeddada warbixintan ayaa ah in la bixiyo macluumaad ku saabsan xogta shaqsiyeed ee la baarayo, iyo sidoo kale halka laga keenay xogta shaqsiyeed iyo sida loogu adeegsan doono baaritaanka. Dhamaadka warbixinta waxaa lagu sharxay qofka la diwaangaliyay xuquuqdiisa.

Ka -qaybgalka baaritaanka iyo bixinta macluumaadka shakhsiyeed waa mid ikhtiyaarka qofka ku saleysan. Sinaba laguuma ciqaabi doono haddii aadan ka qaybgelin cilmi-baaritaanka ama haddii aad hakiso ka qaybgalka baaritaanka.

Waxaad xaq u leedahay inaad ka baxdo baaritaanka wakhti kasta ka hor inta aan la falanqeynin xogta baaritaanka. Waxaad ku wargelin kartaa cilmi-baaraha mas'uulka ka ah baaritaanka iimayl ahaan ka-noqoshada daraasadda.

1. Diiwaan-hayaha baaritaanka

Jaamacadda Helsinki, Cinwaanka: Sanduuqa boostada 3 (Fabianinkatu 33), 00014 Jaamacadda Helsinki

2. Qofka lala xidhiidhi karo iyo cilmi-baaraha u xil saaran

Niina Putkonen
Kulliyadda Waxbarashada
Sanduuqa boostada 9 (Siltavuorenpenger 5A), 00014 Jaamacadda Helsinki
+358 50 475 7818
niina.putkonen (at) helsinki.fi

3. Faahfaahinta xiriirka Sarkaalka Ilaalinta Xogta

Sarkaalka Ilaalinta Xogta ee Jaamacadda Helsinki waxaa lagala xiriiri karaa cinwaanka iimaylka ilaalinta xogta (at) helsinki.fi.

4. Sharaxaada mashruuca cilmi baarista iyo ujeedada habaynta xogta shakhsi ahaaneed

Baaritaankan wuxuu qayb ka yaay buuga baaritaanka ee PHD-gu wuxuuna baarayaa sida noocyada kala duwan ee diinta Islamku ay uga muuqato barista diinta islaamka ee dugsiga iyo wadashaqaynta guriga iyo dugsiga. Buuga PHD-gu wuxuu ka koobanyahay maqaalo cilmiyeysan oo ka hadlaya ifafaalaha marka laga eego dhanka macalimiinta iyo mas'uuliyiinta diinta Islaamka.

Baaritaankan waxaa lagu baarayaa khibradaha waalidka ee ku saabsan ee barashada diinta Islaamka ee dugsiga hoose-dhexe. Jawaab-bixiyaha waxa la waydiisanayaa inuu warqad u qoro cilmi-baaraha oo uu la wadaago khibradiisa. Intaa waxaa dheer, waxaa la weydiin doonaa su'aalo taariikhda hore ee qofka ku saabsan. Waxaad baaritaanka uga qayb qaadan kartaa af finnish, af carabi, af soomaali, af faaris (Farsi) iyo

af ingiriis. Baaritaanka waxaa laga hirgalin doonaa onlaynka dayrta 2021. Walxaha la ururiyey waxa la isticmaali karaa cilmi-baarista ka dib.

5. Waa maxay macluumaadka uu ka kooban yahay walxaha cilmi-baaristu

Baaritaanka waxaa lagu falanqaynayaa macluumaadka shakhsiyeed ee soo socda: jinsiga, da'da, diinta ama fikradda kale, luqadda, waddanka dhalashada. Baaritaanka waxaa loogaga jawaabayaa si qarsoodi ah. Jawaab-celiyuhu waxa kale oo u bannaan inuu ka tago macluumaadkiisa xidhiidhka haddii isagu ama iyadu ay rabaan inay ka qaybqaataan waraysiga cilmi-baarista haddii loo baahdo. Niina Putkonen, oo ah cilmi -baaraha u xilsaaran cilmi -baarista, ayaa arki kara macluumaadka lagala xiriirayo, waxaana lagu kaydiyaa si ka duwan agabka cilmi-baarista ee marxaladda falanqaynta xogta.

6. Ilaha laga soo ururiyo macluumaadka gaarka ah

Walxaha cilmi -baarista waxaa lagu soo ururinayaa qaab elektaroonik ah oo loo adeegsanayo barnaamijka REDCap.

7. Xogta shaqsiga ee xasaasiga ah

Baaritaanka waxaa lagu falanqaynayaa macluumaadka hoos ku qoran ee khuseeya macluumaadka kooxaha gaarka ah (sida xogta shaqsiga ee xasaasiga ah) si waafaqsan qodobka 9 ee Xeerka Ilaalinta Xogta: Caqiido diimeed ama falsafadeed.

Ka shaqaynta xogta xasaasiga ah waxay ku salaysan tahay Qodobka 9 (2) (j) ee Xeerka Ilaalinta Xogta (ka shaqaynta ayaa lagama maarmaan u ah ujeedooyinka cilmi baadhista) iyo Qodobka 6 (1) (7) ee Xeerka Ilaalinta Xogta.

8. Aasaaska sharciga ee ka shaqaynta xogta shaqsiyeed

Xogta shaqsiyeedka waxaa looga baaraandegi doonaa sida soo socota si waafaqsan Qodobka 6 iyo firqada 1 ee Xeerka Ilaalinta Xogta Guud: Hawsha danta guud ku jirta: cilmi-baadhis cilmiyaysan ama taariikheed ama tirokoob (Qaybta 4 (3) ee Xeerka Ilaalinta Xogta).

9. Qaabileyaasha macluumaadka

Walxaha cilmi -baarista waxaa lagu soo ururinayaa qaab elektaroonik ah oo loo adeegsanayo barnaamijka REDCap. Walxaha cilmi-baarista waxaa arkaya cilmi-baarayaasha iyo kuwa turjumaya walxaha. Maqaallada cilmi -baarista ee qoraalka waxaa lagu qoray iyadoo lala kaashanayo kormeerayaasha cilmi-baarista ee jaamacadda.

10. Wareejinta xogta meel ka baxsan Aagga Dhaqaalaha Yurub

Xogta looma gudbin doono meel ka baxsan Aagga Dhaqaalaha Yurub.

11. Go'aan qaadashada otomaatiga ah

Daraasaddu ma samayso go'aanno toos ah oo saamayn weyn ku leh cidda cilmi-baarista laga sameynayo.

12. Ilaalinta xogta shaqsiga

Xogta shakhsiga ah ee ku jirta maaddada cilmi -baarista ayaa loo kaydinayaa si amni ah oo ay arki karaan oo kaliya shaqsiyaadka u baahan inay macluumaadka arkaan. Walxaha waxaa laga saarayaa macluumaadka

si toos ah looga aqoonsan karo shaqsiyaadka ka qaybqaatay cilmi-baarista ka hor inta aan xogta la gorfeynin.

13. Muddada habaynta xogta shakhsi ahaaneed ee baaritaankan

Cilmi-baaris lagu soo saarayo buug PHD ah 2021–2024.

14. Falanqaynta macluumaadka shakhsiga marka uu baaritaanku dhammaado kaddib

Macluumaadka cilmi -baarista waxaa loo kaydindoonaa cilmi -baaris cilmiyeed oo ku -habboon oo wakhti dambe oo kale la samayn doono, iyadoo la waafajinayo shuruudaha Xeerka Ilaalinta Xogta.

15. Waa maxay xuquuqda qofka la diwaangaliyay uu leeyahay, maxayse keenaysaa in xuquuqda laga leexdo

Qofka lagala xiriirayo arrimaha la xiriira xuquuqda mawduuca waa qofka lagu sheegay barta 1 ee ogeysiiskan.

Marka la eego Xeerka Ilaalinta Xogta, qofka la diwaangaliyay wuxuu xaq u leeyahay:

- helitaanka macluumaadka
- saxitaanka macluumaadka
- tirtiraada macluumaadka iyo in la ilaawo
- xaddidaadda falanqaynta macluumaadka
- in uu ka wareejiyo macluumaadka hal nidaam una wareejiyo mid kale
- ka hor istaagga falanqaynta macluumaadka
- in go’aan automaatig ah laga gaadhi waayo.

Si kastaba ha ahaatee, qofka la diwaangaliyay xuquuqdiisa oo dhan xaalad kasta kuma isticmaali karo. Xaaladda waxa saameynaya, tusaale ahaan, sababta loo falanqaynayo macluumaadka shaqsiga ah.

Macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan xuquuqda qofka la diwaangaliyay ee ee xaaladaha kala duwan waxaa laga heli karaa bogga internetka ee Guddiga Ilaalinta Xogta: https://tietosuoja.fi/rekisteroidyn-oikeudet-eri-tilanteissa

Haddii falanqaynta macluumaadka shakhsiga ah ee baaritaanku aanay u baahnayn in qofka la aqoonsado oo aynan suuro gal u ahayn diwaan ilaaliyaha in uu aqoonsada qofka la diwaangaliyay, in uu xaq u yeesho hubinta macluumaadka, saxitaanka, ka saaridda, xadeynta falanqaynta, waajibaadka ogaysiiska iyo wareejinta laguma dabaqayo, haddii cidda la diwaangaliyay uunan bixinin maxluumaad dheeraad ah oo suuro galinaya in la aqoonsado (Qodobka 11 ee Xeerka Ilaalinta Xogta).

Go'aanka Ilaalinta Xogta iyo Xeerka Ilaalinta Xogta ee Finland ayaa oggolaanaya in la duudsiyo xuquuqda qofka la diwaangaliyay marka macluumaadka shakhsiga ah loo falanqaynayo si duudsinaysa in xuquuqdiisa la suuro galiyo ama ay adkaynayso in falanqaynta ujeedadeeda la gaaro.

Baahida loo qabo in meesha laga saaro xuquuqda qofka la diwaangaliyay waxaa mar walba lagu qiimeeynayaa xaaladda kiiska gaar u ah.

Waxaad xaq u leedahay inaad cabasho u gudbiso Xafiiska Wakiilka Ilaalinta Xogta haddii aad aaminsantahay in falanqaynta macluumaadkaaga shakhsiyeed lagu jabiyay sharciga ilaalinta xogta ee lagu dabaqi karo.

Macluumaadka xiriirka:

Xafiiska Sarkaalka Ilaalinta Xogta
Cinwaanka booqashada: Ratapihantie 9, dabaqa 6aad, 00520 Helsinki
Cinwaanka boostada: SB 800,00521 Helsinki
Xiriirinta: 029 56 66700.
Iimayl: tietosuoja(at)om.fi